



XAFIISKA AGAASIMAHA

Kate Brown, Gobanatoore

Oregon
Health
Authority

500 Summer St NE E20

Salem OR 97301

Codka: 503-947-2340

Faakiska: 503-947-2341

Hagista dib-u-furida ee Gobolka oo dhan – Ciyaaraha/Isboortiyada Xirfada ah, Ku Laabashada Ciyaarta oo Xaddidan

Taariikhda Dhaqangalka: Ogosto 18, 2020

Amarka: Lambarka Amar Fulinta 20-27, ORS 433.443, ORS 431A.0101

Hirgelinta: Illaa iyo inta ay hagista u baahan tahay u hoggaansanaanta qodobbada qaarkood, waxaa loo hergelin karaa sida lagu qeexay Amar Fulinta 20-27, qoraalka 26.

Khusaynta: Hagistani waxa ay khuseysaa tababarada, tababarka iyo cayaarta isboortiyada xirfada ah ee isboortiyada gaarka ah ee gobolka oo dhan.

Ciyaartoyda/Kooxaha ku sugan banaanka Oregon ee ciyaar ugu safraya Oregon waa iney raacaan hagista lagu qeexay dukumintigan.

Ciyaaraha/Isboortiyada Xirfada ah:

Kooxaha Ciyaaraha/Isboortiyada Xirfada ah ee raba inay ku ciyaaraan Gobolka Oregon waa inay u soo gudbiyaan borotokoolo Maamulka Caamifaadka Oregon (OHA) iyo xafiiska Gudoomiyaha si ay u hibiyaan in tababarka, tartanka iyo ciyaarta ay waafaqsan tahay dhammaan hagista caafimaadka bulshada iyo shuruudaha marxallada ay ku jirto degmada. Tababarka, tartanka iyo cayaarta ma bilaabmi karaan illaa marka borotokoollada ay dib u eegaan oo ay ansixiyaan xafiiska Gudoomiyaha iyo OHA.

Cayaaraha/Isboortiyada xirfada ah ee lagu tababaranayo laguna ciyaarayo gudaha Gobolka Oregon waa laga dhaafay dhamaan hagista isboortiyada ee kale ee la soo saaray iyo kooxaha isboortiyada xirfada ah waxaa laga filayaa inay u hoggaansamaan heerarka ay u sameysteen horyaal kasta ee tababarka, ciyaarta, raad-raacida xiriirada (contact tracing), baarista, karantiilinta iyo wixii ah aag tixgalinta kale, oo ay ka mid yihiin borotokoollada ay ansixiyaan OHA iyo Xafiiska Gudoomiyaha. Cayaaraha/isboortiyada xirfada ah ee lagu ciyaaro Oregon waa inay u hoggaansamaan [Hagista Dib u Furista Wajiga/Marxallada 2 ee OHA – Hawl kawadayaasha Goobaha iyo Dhacdada](#).

Illo Dheeraad ah:

- [Calaamado aad dhejin karto](#)
- [Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskaraha, Gaashaanka Wajiga, Daboolka Wajiga](#)
- [Hagida CDC ee Maamulayaasha Jardiinooyinka iyo Xarumaha Madadaalada](#)

Helitaanka Dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us.